A "Grand Stabilization Plan" MoU for South Central Somalia

"QORSHAHA DEJINTA & XASILINTA" HESHIISKA IS AFGARADKA IGAD EE BARTAMAHA IYO KOOFURTA SOOMAALIYA.

Heshiiskaan oo ka kooban 9 Qeybood oo qeyb kasta ay kasii kooban tahay qodobo kala duwan ayaa qeexaya in dowladda Soomaaliya ay ogolaato in maamullada laga dhisayo ama loo sameynayo Bartmaha iyo Koofurta Soomaaliya aysan u madax banaaneyn dowladda madaxweyne Xasan Sheekh, sidaasi darteedna ay tahay in ay markasta 3-dal ee Kenya, Itoobiya iyo Soomaaliya ka wada tashadaan wixii shaqo ah oo laga qabanayo qeybahaas gudaha Soomaaliya.

Sida ku cad heshiiskaan Ma jirto dowlad kaligeed go'aan ka gaari karta maamulka qeybaha bartamaha iyo Koofurta Soomaaliya, haddii ay noqon lahayd dowladda Soomaaliyaa, Kenya ama Itoobiya, waana in ay isla dhiraan dhiriyaan tilaab kasta oo la sameynayo haddii kale waa waxba kama jiraan.

Sida ku cad heshiiskaan waxaa howshaas fulinaya guddi ka kooban 3-da dowladood oo hoos tegaya xafiis cusub oo IGAD ku leedahay dalka Itoobiya, kaas oo keenaya hindisaha lagu shaqeynayo iyo sida wax loo maamulayo, xafiiskaas waxaa ka madax ah nin Kenyaati dhalad ah.

Sida ku cad heshiiskan guddiga howshaan fulinaya ee ka socda 3-da dowladood waa in ay wax kasta oo ay samaynayaan kawada tashadaan, wixii aysan isla ogleyn waa in loo codeeyaa waana in lagu socdaa codka 3-da guddi meeshii uu u bato, haddii aysan kuwada qancin waxaa dhex dhexaaadin kara oo kaliya xafiiska IGAD ee Addisabab ee ninka Kenyaatiga ah uu madaxda ka yahay.

Sida ku cad heshiiska madaxa Xafiiskaasi wuxuu leeyahay awood buuxda oo fulineed, wuxuu hoos tagaa IGAD, xafiiskaasi shaqo kuma lahan mana hoos tago xafiiska xoghayaha guud ee IGAD ee dalka Jabuuti oo waa ka madax banaan yahay.

SIDA LOO DHIGAY QEYBAHA IYO QODOBADA LAGU HESHIIYEY EE UU KA KOOBAN YAHAY HESHIISKAAN IYO MACNIHIISABA.

OFFICIAL MoU AGREEMENT DOCUMENT

QODOBKA KOOWAAD

UJEEDO:

Ujeedada heshiiskaani waa Hab raaca, qorshe howleedka xasilinta iyo nabadeynta Bartamaha iyo Koofurta Soomaaliya.

QODOBKA LABAAD

QEEXID IYO FASIRAAD

Sida ku xusan heshiiskaan haddii aan wax iska bedelin waxaa loola jeedaa sidan :

DHINACYADA = Waxaa loola jeedaa Guddiga Wada jirka ah ee IGAD oo ka kooban Wafuud kala meteleysa Ethiopia, Kenya iyo Soomaaliya.
HOWL FUDUDEEYAHA IGAD = Waxaa loola jeedaa Xafiiska ama Madaxa Xafiiska fududenya qorshaha xasilinta iyo nabadeynta Bartamaha iyo Koofurta Soomaaliya ee ururka IGAD.
IGAD= Waxaa loola jeedaa Magaca urur goboleedka IGAD oo lasoo gaabiyey.
XOGHAYAHA GUUD EE FULINTA IGAD = Waxaa loola jeedaa Xoghayaha Fulinta urur goboleedka IGAD.

IS AFGARAD = Waxaa loola jeedaa Heshiiskaan is af garadka ah iyo qodobada uu ka kooban yahay ee ay ku heshiiyeen Guddiga wada jirka ah ee IGAD oo ka kooban Magacyada dhinacyada kor lagu xusay in ay ku heshiiyeen.

GUDDIGA WADA JIRKA AH EE IGAD: Waxaa loola jeedaa: IGAD joint Committee oo ka kooban Wafuud kala meteleysa Ethiopia, Kenya iyo Soomaaliya

QODOBKA SADDEXAAD

UJEEDADA QODOBADA KU QORAN HESHIISKAAN

Heshiiskaan is af garadka ah wuxuu sahlayaa oo fure u yahay Qaab howleedka ay ku wada shaqeyn karaan, ***GUDDIGA WADA JIRKA AH EE IGAD*** iyo sida ay suurta gal ku noqoneyso in ay isla fahmaan hal qaab howleed oo mideysan oo ay heshiis kuwada yihiin iyagoo isku mid ah oo siman in ay ku wada shaqeeyaan, iyagoo qiimeynaya guud ahaan xiriir ku dhisan deris wanaag, isla markaana si gaar ah u fiirinaya oo tix gelinaya Hindisayaasha urur goboleedka IGAD.

QODOBKA AFARAAD

UJEEDKA LAGA LEEYAHAY HESHIISKAAN.

Ujeedada rasmiga ah ee laga leeyahay ama ka dambeysa heshiiskaan ***IS AFGARAD*** waa xoojinta iyo ka miro dhalinta **QORSHAHA DEJINTA & XASILINTA** iyadoo la ballaarinayo guddiga wadajirka ah IGAD oo lagu kordhinayo xubno guddi cusub oo ay ku darsatay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA SHANAAD

DHINACYADA LA ISKA KAASHANAYO

Saxiixayaasha heshiiskaan yoolkoodu waa sidaan soo socota:

1. Fududeynta deganaashaha; dardar gelinta nabadda iyo dib u heshiinta iyo sameynta qorshe maamul iyo mid siyaasadeed loo wada dhan yahay oo laga doonayo in loo diyaariyo deegannada xoroobay ee Bartamaha iyo Koofurta Soomaaliya.

2. Horumarinta iyo hirgelinta qorshe siyaasadeed mid ah oo hay'adaha kala duwan ee dowladda lagu sameeyo, kuwaas oo loo diyaarinayo in ay si buuxda u fulin karaan ilaalinta waajibaadkooda nabadda iyo deganaasho, ilaalinta nidaamka, sharciga iyo kala dambeynta, dhowrista xuquuqda banii'adamnimada iyo arrimaha xuduudo ka tilaabista.
3. Sameynta maamulo Kumeel gaar ah oo wada tashi ku saleysan kuwaas oo u gogol xaaraya hirgelinta maamullo buuxa oo laga sameeyo tuulo, degmo ilaa Gobol, kuwaas oo si buuxda wax u maamuli kara ama u shaqeynaya.
4. In si buuxda oo hufan loo wadaago wararka ku saabsan shaqada ***GUDDIGA WADA JIRKA AH EE IGAD*** ee ku xusan qodobada heshiiskaan.
5. Hubinta in heshiiska ***GUDDIGA WADA JIRKA AH*** iyo qaabka loo marayo hirgelintiisa in ay noqoto mid ku salaysan talo wadaag xoojinaya wada shaqeynta dhinaca siyaasadda iyo weliba talo soo jeedin ka timaada hadba deegaanka ay quseyso dad ka soo jeeda.

QODOBKA LIXAAD

WADA SHAQEYNTA IYO ISGARABSIGA.

1. Dhinacyadu waa in ay sida caadiga ah ku wada shaqeeyaan xiriir toos ah oo dhex maraya, isla markaana ay latashadaan xafiiska howl fududeynta IGAD.
2. Waa in ay si joogto ah u kulmaan oo xiriiraan Dhinacyada heshiiskaan ka dhexeeyo iyo xafiiska xoghayaha fulinta IGAD ama xafiiska xoghayaha howl fududeynta IGAD midkood si ay u fulaan qodobada ku xusan heshiiska iyo wixii kale ee heshiisyo kale oo wada jir ah.
3. ***HOWL FUDUDEEYAHA IGAD*** wuxuu wakiil ka noqonayaa IGAD si uu howlahooda ugu sahlo guddigaan, waana inuu ahaadaa mid awood buuxda u leh inuu dhinacyadaan howshooda fududeyn karo.
4. Dhinacyadu waa in ay wada dhowraan qodobada heshiiska iyo sharciyada ku qoran ee laga noqdo ama guddigu dib u dhigo waqtiga la fulinayo, si uu miro dhal u noqdo qorshaha xasilinta ee IGAD. (ee halkaan ku lifaaqan).

QODOBKA TODOBAAD

XALKA QODOBADII LA ISKU KHILAAFO.

Dhammaan wixii khilaaf ah ama la isku mari waayo ee ka soo kordha tarjumaadda iyo eray bixinta qodobada ku xusan heshiiskaan isafgaradka ah waa in lagu xalliyaa qaab wada tashi ah iyo wadahadal.

QODOBKA SIDEEDAAD

JOOJIN AMA LAALIS QODOB.

Dhinacyada oo dhan waa in ay si joogto ah uga wada hadlaan dib ugu noqoshada hirgelinta qodobada heshiiskaan is afagaradka ah, iyadoo haddii loo baahdana ay si wadajir ah joojin karaan ama laali karaan qodobkii ay isku wada raacaan dhammaantood.

QODOBKA SAGAALAAD

DHAQAN GALKA IS AFGARADKAAN.

1. Heshiiskaan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka ay dhinacyadu isku raacaan faafinta iyo qodobada lagu wada heshiiyey.
2. Dhinacyadu waxay si wada jir ah u joojin karaan ama laali karaan is heshiiskaa xilli kasta oo ay si wadajir ah isku af gartaan dhamaantood.
3. Joojinta iyo laalista is afgaradkaan waa in aysan saameyn ku yeelan xiriirka iyo derisnimo wanaagga dhinacyada wada gaaray heshiiskaan ee wadamada IGAD.

DHAMMAAD

FASIRAAD DHEERIYA IYO MACNBEYN HESHIISKAAN

WAXYAABAHA KU CAD HESHIISKAAN EE AAN SI CAD CARRABKA LOOGU DHUFAN.

XOGHAYAHA FULINTA IGAD WAXAA LOOLAA JEEDAA : ENG. MAHBOUB MAALIN, waa xoghayaha guud ee urur goboleedka IGAD, xafiiskiisu wuxuu ku yaal dalka Jabuuti, wuxuuna u dhashay oo ka soo jeedaa Soomaalida dalka Kenya, waxaa loo yaqaan: IGAD Executive Secretary Eng. Mahboub Maalim.

XOGHAYAHA FUDUDEYNTA HOWLAHA NABADDA IYO DIB U HESHIISIINTA SOOMAALIYA EE IGAD WAXAA LOOLA JEEDAA: Kipruto Arap Kirwa, Waa Kenyati Asal ah, xafiiskiisu wuxuu ku yaallaa Addis Ababa, dhinaca awood fulinta iyo go'aanada ay isku mid yihiin xafiiska kale ee xoghayaha fulinta, mana hoos tago xafiiskaas. Waxaa loo yaqaan: IGAD Facilitator for Somalia Peace and National Reconciliation Kipruto Arap Kirwa.

GUDDIGA WADA JIRKA AH EE IGAD WAXAA LOOLA JEEDAA GUDDI KALA METELAYA QAAR KA MID AH WADAMADA IGAD OO KALA AH: Soomaaliya, Kenya iyo Ethiopia. Waxaa loo yaqaaan IGAD joint Committee, Sida ku cad warbixinno kale oo si rasmi ah ay u soo saareen wasaaradaha arrimaha dibadda Kenya iyo Ethiopia, guddigaan wuxuu hore uga koobnaa Kenya iyo Ethiopia, balse waxaa haatan lagu kordhiyey Soomaaliya guddi ay leedahay, Guddiga Soomaaliya waxaa madax ka ah oo hogaaminaya taliyihii hore ee Laanta Nabad sugidda Dowladda Soomaaliya, lamana hubo oo ma cadda in dowladda xilligaan ee madaxweyne Xasan sheekh la socoto guddigaan ama ay iyadu soo magacowday.

WAXYAABAHA AY SI GAAR AHAANEED HESHIISKAAN KA HOR UGU HESHIIYEEN IN AY ISKA KAASHADAAN DOWLADAHA ETHIOPIA IYO KENYA

Kenya building a power distribution station for Ethio-Kenya power supply

Kenya, Ethiopia agreement on regional security cooperation.

The Office of IFSPR is independent from IGAD's Secretariat. The IGAD Facilitator is based in Addis Ababa, while the IGAD Secretariat is based in Djibouti. For further background information, on April 28, 2010, a Memorandum of Understanding on Somalia has been signed among AMISOM, UNPOS, and IGAD Facilitator. This tripartite

MoU marginalizes IGAD Executive Secretary, Inj. Mahboub Maalim who is of a Somali-Kenyan origin from Somalia peace process.

IGAD Facilitator for Somalia Peace and Reconciliation (IFSPR) a statement and Memorandum of Understanding (MoU) on Grand Stabilization plan (GSP) for South and Central Somalia.